

Su'aalaha iyo Jawaabaha—Kadib Ilmo-Korsashada

Jawaabaha su'aalaha khuseeya barnaamijka caawimada korsashada, iyo khayraadka la heli karo si lagaaga caawiyo korsashada canugaaga.



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Hordhac

HAMBALYO go'aankaaga inaad ilmo korsatid. Adigoo ilmo korsanaya, waxaad la yeelatay xidhiidh dareen, bulsho iyo sharci canugaaga.

Ilmo-korsashadu waxay noqon kartaa caqabad. Sanadkii 1971, Sharciga Gobolka Washington wuxuu ansixiyey Xeerka Nidaamka Caawimada Ilmo-Korsashada si loo asaaso Barnaamijka Caawimada Ilmo-Korsashada si loo suurto galiyo korsashada caruurta leh baahiyo gaara. Mardanbe sanadkii 1980, dawlada fadaraalka ayaa ansixisay Xeerka Kaalmada Ilmo-Korsashada iyo Daryeelka Caruurta ee 1980-PL 96-272, kaasoo siinaya maalgalin fadaraalka ah barnaamijka caawimada ilmo-korsashada.

Department of Children, Youth, and Families (Waxda Caruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska, DCYF) waxay siisaa adeegyo caawimo ilmo-korsashada iyadoo heshiis kula galaysa kahor intaan la dhammeystirin ilmo-korsashada. Heshiiskani wuxuu u ogolaanayaa DCYF inay bixiso khayraadka kadib ilmo-korsashada ee caymiska caafimaadka, latalinta, daaweynta ku saleysan baadhista



caafimaad iyo haddii la isku raaco, lacag kaash bile ah oo kaa caawinaysa inaad dabooshid baahiyaha canugaaga.

Buug-yarahani wuxuu kaa caawinayaa inaad heshid jawaabaha su'aalaha khuseeya barnaamijka caawimada ilmo-korsashada oo aad aqoonsatid khayraadka bulshada ee muhiimka ah kaana caawin kara korinta canugaaga. Lataliyahaaga barnaamijka caawimada ilmo-korsashada ayaa sidoo kale diyaar u ah inuu ka jawaabo su'aalaha khuseeya khayraadka barnaamijka.

Mawduucyada

Su'aalaha iyo Jawaabaha	2
Laxidhiidhida Shaqaalaha Caawimada Ilmo-Korsashada.....	2
Heshiiska Caawimada Ilmo-Korsashada	3
Kabka Barnaamijka	4
• Lacagta Kaashka ee Bilaha	4
• Caafimaadka	6
• Macluumaad dheeriya oo khuseeya Medicaid:.....	7
• Daryeelka Ilkaha	7
• ABCD – Daryeelka Ilkaha ee dhalaanka iyo caruurta yaryar	7
• Helida Daawooyinka.....	7
• Baadhitaanada Indhaha iyo Ookiyaalaha Indhaha...	7
Macluumaad Dheeraad ah	13
Marka Laga Guurayo Gobolka.....	14
Caawimooyinka/Adeegyada Bulshada.....	14
Khayraadka Onlaaynka.....	15


• Adeegyada Caafimaadka Maskaxda	8
• Waxbarashada.....	11
• Nidaamka Codsiga	11
• Kharashka Kuhaboon	12
• Shuruudaha iyo Kaqeybgalka Joogtada ah ee Barnaamijka.....	12
• Kharashaadka Dhammeysirka Ilmo-Korsashada....	12
• Tababarka.....	12

Su'aalaha iyo Jawaabaha

Laxidhiidhida Shaqaalaha Caawimada Ilmo-Korsashada

Q: Yaan la xidhiidhayaa marka ka qabo heshiiskayga ama adeegyada?

A: Laxidhiidh qofka kaala xaajooday heshiiskaaga. Haddii aanad garaneyn qofka kaala xaajooday heshiiskaaga, wac 1-800-562-5682, si degan u dhageyso codka la duubay oo raac tilmaamaha. Haddii aad ku nooshahay meel ka baxsan gobolka Washington, la xidhiidh lataliyaha kaa caawiyey heshiiskaagii hore.



Heshiiska Caawimada Ilmo-Korsashada

Q: Waa maxay heshiiska caawimada ilmo-korsashadu?

A: Heshiiska caawimada ilmo-korsashadu waa qandaraas sharciya oo u dhaxeeya adiga iyo DCYF. Heshiisku wuxuu aqoonsanayaa heshiisyada iyo shuruudaha labadiinaba adiga iyo waaxda ay tahay waajib inaad raacdaan si aad uga qeybgashid barnaamijka caawimada ilmo-korsashada.

Q: Goormuu heshiiskani dhaqan galayaa?

A: Ilaa haddii kale lagu sheegay heshiiska, qandaraasku wuxuu dhaqangalayaa taariikhda ilmo-korsashada la dhammeystiro.

Q: Ka waran haddii canuga aan korsanayo ka weyn yahay da'da 13, taasi ma waxbay ka badelaysaa caawimada?

A: Haddii aad korsanaysid canug 13 sano ilaa 17 sano jir ah, canuga waxa loo tixgalin doonaa qof madaxbanaan dhanka Free Application for Federal Student Aid (Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Ardeyga ee Fadaraalka, FASFA). Haddii aad korsanaysid canug ka weyn da'da 14 ilaa da'da 17 sano jir, canugu wuxuu xaq u yeelanayaa inuu codsado barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee College Bound. Haddii aad korsanaysid canug ka weyn 16 sano ilaa 17 sano jir, canugu wuxuu kusii jiri karaa barnaamijka caawimada ilmo-korsashada ilaa da'da 21 haddii uu buuxiyo shuruudahan:

- Kaqeybgalka dugsiga sare ama barnaamijka shaahadado u dhiganta dugsiga sare/GED.
- Kujiro koolej ama barnaamij dugsi farsamo gacmeed ah, ama codsaday oo si degdega iskaga diwaangalin karo waxbarashada dugsiga sare.
- Kaqeybgalayo tababar shaqo ama hawl ka caawinaysa ka gudbida caqabadaha shaqaaleysiinta.
- Ku hawlan yahay shaqaaleysiinta sideed saac ama wax ka badan bishiiba.
- Qofka dhalinyarada ahi ma awoodo inuu ka midnoqdo qeybaha kuhaboonaanshaha sare iyadooy ugu wacan tahay xaalad caafimaad oo la cadeeyey.

Intaa waxa dheer, barnaamijka taageerada ilmo-korsashada la balaadhiyay ee dhalinyarta waxa laga yaabaa inuu ku haboon yahay Education and Training Voucher Program (Waxbarashada

iyo Barnaamijka Tababarka, ETV). Macluumaad dheeraad ah oo mawduucan ku saabsan ayaa laga helayaa Qaybta Waxbarashada.

Q: Goorma ayuu heshiisku dhamaanayaa?

A: Heshiisku wuxuu dhamaanayaa:

- Cunuga la korsaday wuxuu gaadhay da'da 18 (haddii aanu ilmuhu dhiganayn barnaamij waxbarasho oo labada galin ah oo kasbanaya shahaado dugsi sare ama shahaado dugsi sare u dhiganta/GED).
- Marka waalidka ama cunugu geeriyoodo.
- Ma tihid sharci ahaan ama dhaqaale ahaan mid masuul ka ah cunuga.
- Cunuga la korsaday inta u dhaxaysa 16 ilaa 17 ma buuxinayo shuruudaha lagu dejiyay heshiiska taageerada korsashada ee la balaadhiyay ilaa da'da 18 ka dib.

Q: Ma heli doonaa ogeysiis ku saabsan joojinta barnaamijka ka hor inta uusan cunugaygu gaadhin 18 sano jir?

A: Waxa laga yaabaa inaad hesho ogeysiis kugula talinaya in heshiisku dhammaanayo kadib dhalashada 18aad ee cunugaaga. Waa mas'uuliyaddaada inaad la xidhiidhto barnaamijka taageerada korsashada ugu yaraan 90 maalmood kahor dhalashada 18aad ee cunugaaga. Kababka taageerada ilmo-korsashada waxay si toos u istaagi doontaa marka la gaadho dhalashada 18aad ee cunugaaga ilaa barnaamijku adiga kaa maqlo.

Q: Maxaa dhacaya haddii cunugaygu 18 jir yahay oo uu weli yahay arday labada galinba dhigta dugs i sare ama labada galinba shaqeeya si uu u dhammaystiro shahaado u dhiganta dugsiga sare?

A: Haddi ay arintu sidaas tahay, cunugaygu waxa laga yaabaa inuu ku sii jiro barnaamijka haddii, ka hor inta aanu cunugu 18 jir gaadhin, waalidku codsado in taageerada korsashada la sii wado oo laga helo warqadda dugsiga oo sheegaysa in cunugu yahay arday labada galinba jooga oo laga helo waxa la filayo taariikhda qalin-jabinta.



Q: Ma codsan karaa in dib loo eego heshiiskayga?

A: Mar kasta oo ay is beddelaan xaaladda qoyska ama xaaladda cunug, waxaad codsan kartaa in aad dib u eegto heshiiska adigoo qoraal u diraya la taliyaha barnaamijka taageerada ilmo-korsashada. La-taliyahaagu wuxuu kugula talin doonaa dhukumeentiyada aad u baahan tahay inaad soo gudbisoo ee ku saabsan baahiyaha gaarka ah ee cunugaaga iyo duruufaha hadda jira ee qoyskaaga.

Q: Waa maxay isbeddellada xaaladda ee u baahan inaan si degdeg ah u ogeysiyo la taliyaha barnaamijka taageerada korsashada?

A: Isla markiiba ogeysii la taliyaha barnaamijka taageerada korsashada marka:

- Cunugaagu hadda aanu ku noolayn gurigaaga.
- Ma tihid sharci ahaan mid masuul ka ah cunuga.
- Waxaa jira isbeddel ku yimid ciwaankaada asalka ahaa.
- Cunugga ama waalidku uu dhinto.
- Ay jiraan wax kabadalo kasoo kordha xaalada guur ee waalidka.
- Ay jiraan isbadalo sharci ama jidheed oo la xidhiidha xanaanaynta cunuga.
- Cunugu wuxuu noqonayaa mid u qalma barnaamij kale oo federaal ah sida kababka Adeega Bulshada, Kaalmada Supplemental Security Income (Dakhliga ee Adeega Bulshada, SSI), kababka Veteran's Administration ama Temporary Aid to Need Families (Kaalmada Ku Meel Gaadhka ah ee Qoysaska U Baahan, TANF).

Kababka Barnaamijka

Lacagta Kaashka ee Bilaha

Q: Barnaamijka taageerada ilmo-korsashada miyuu bixiyaa dhammaan kharashyada korinta cunugaaga?

A: Waalidka(waalidiinta), waxaad mas'uul ka tahay dhaqaale ahaan baahida cunugaaga. Barnaamijka taageerada ilmo-korsashada waa in lagu daraa agabkaaga si uu kaaga caawiyo buuxinta baahiyaha caadiga ah iyo kuwa gaarka ah ee cunugaaga. Inta ay le'eg tahay taageerada aad u baahan tahay si aad uga caawiso buuxinta baahiyaha cunugaaga waxa lagu go'aamiyaa wadahal iyo gorgortan idin dhexmara adiga iyo lataliyaha barnaamijka taageerada korsashada.

Q: Maxaan tixgelinayaa marka aan ka gorgortamayo lacag-bixinta kaashka ee billaha ah?

A: Markaad bilowdo inaad ka gorgortanto heshiiska taageerada cunugaaga, waxaa jira saddex arrimood oo la tixgelin karo:

- Kharashyada wax lagaga qabanayo baahiyaha gaarka ah ee cunuga.
- Duruufaha qoyska.
- Inta ugu badan ee sharci-dejinta ay u ogolaato RCW.

Baahida cunugaagu waxay ku xidhan tahay baahidiisa ama baahideeda caafimaad ee gaarka ah, jidheed ama dareen. "Duruufaha qoyska" waxa lagu qeexay Children's Bureau (Xafiiska Caruurta) ee dawlada fadaraalka taasoo la macno ah awooda qoysku inay kuaraan baahiyaha cunuga ee xaaladaha qoyska. Dakhliga, deynta, guriyeynta, gaadiidka, booska, tirada qoyska, shaqooyinka waalidka, baahiyaha caafimaadka waalidka, baahiyaha xubnaha kale ee qoyska iyo tirro arrimo kale ayaa la tixgelinayaa. Ma jiro qaacido go'an oo lagu go'aaminayo lacagaha kaashka ee billaha ah.

Waxaa muhiim ah in la xasuusto in lacagta kaashka ee bilaha ah lagu beddeli karo dib u eegis lagu sameeyo heshiiska, haddii baahida cunugaaga ama xaaladda qoyska ay isbeddelaan. Lacag-bixinta kaashka ee billaha ah lagama gorgortamo iyadoo lagu salaynayo dhibaatooyinka la filayo.

Sharci-dejinta Gobolka Washington waxa ay xadiday cadadka lacag bixinta bilaha ah ee lacagta kaashka ah ee la sharciyeeyey ugu badnaan kharashka dayactirka daryeelka ilmo-korinta ee uu cunugu heli doono haddii cunugu ku jiro daryeelka ilmo-korinta. Natiijo ahaan, lacagta laga gorgortamayaa waxay ka bilaaban kartaa \$0 mana dhaafi karto inta ugu badan ee sharci-dejinta. Inta ugu badan ee sharci-dejinta waxay ku salaysan tahay da'da cunuga ee wakhtiga ilmo-korsashada.



Q: Sidee loo go'aamiyaa taageerada korsashada lacagta kaashka ah bishii?

A: Lacagta kaashka ah ee bishiiba mar la bixiyo waxaa lagu go'aamiyaa wadahalal dhexmara waalidiinta korsaday iyo lataliyaha taageerada korsashada ee DCYF. Lacag-bixintu waxay la socotaa khayraadka waalidka si ay u daboosho baahiyaha caadiga ah iyo kuwa gaarka ah ee cunuga ee la saadaaliyay muddo dheer mana aha inay daboosho baahiyaha la filayo.

Heshiisku waxa uu tixgeliyaa arrimo gaar ah oo qoyska ka dhexjira:

- Xajmiga qoyska.
- Kharashaadka nololaha caadiga ah.
- Baahiyaha gaarka ah ee qof kasta oo qoyska katirsan.
- Dakhliga qoyska.
- Khayraadka qoyska iyo qorshaha kaydshada.
- Baahiyaha caafimaad iyo cusbitaal.
- Awooda qoyska ee ah inay iibsadaan ama ay helaan daryeel.
- Kharash kasta oo kale oo uu cunugu u baahan yahay si uu noqdo cunug la korsaday.

Waa in la ogaadaa in joogteynta qoysaska ee taageerada korsashada lacag bixinta billaha ah aysan ahayn hadafka barnaamijka. Qoysaska leh dakhli isku mid ah iyo duruufo la mid ah qasab maaha in ay ku heshiiyaan noocyo ama cadad gargaar oo isku mid ah. Waa kala duwanaanshaha xaalad kasta ee cunug/qoys kasta oo go'aamisa lacagta kaashka ee billaha ah.

Xogta la helay: 42 U.S.C. § 673 (a), 42 U.S.C. § 673 (a) (3), Buugga Siyaasadda Daryeelka Cunuga 8.2D.4 (Q.1), WAC 110-80-0220 iyo RCW 74.13a.025.

Q: Waa maxay faa'iidooyinka aan ka ahayn lacag-bixinta kaashka ee billaha ah ee lagu bixiyo barnaamijka taageerada ilmo-korsashada ee cunug kasta oo la korsado?

- Kababka caafimaadka iyo ilkaha iyada oo loo marayo Medicaid.
- Kaalmada la-talinta ee horay loo oggolaaday.
- Waxqabadyo daweynta ee cadaynta ku sallaysan.
- Lacag soo celinta ilaa \$1500 cunugiiba ee loogu talagalay kharashaadka korsashada.

Caafimaadka

Q: Caymis nooc ee ah ayay Washington Apple Health (Medicaid) siisaa carruurta taageerada ilmo-korsashada?

A: Apple Health (Medicaid) waxaa lagu bixiyaa lacag la'aan waxayna dabooshaa cunugaaga iyada oo loo marayo:

- Barnaamij ka socda Coordinated Care of Washington (Daryeelka Isku-dubbaridka ah ee Washington, CCW), oo loo yaqaan Apple Health Core Connections (Xidhiidhaha Muhiimka ah ee Caafimaadka, AHCC), sida caymiska aasaasiga ah ee caafimaadka jidhka iyo hab-dhaqanka labadaba, ama
- Barnaamijyada caymiska labaad ee soo socda haddii aad cunugaaga kudarto qorshahaaga caafimaad ee gaarka ah:
 - Bixiyaha Koowaad (kharashka adeega) ee caafimaadka jidheed.
 - Medicaid ee Managed Care Organization (Shirkada Daryeelka Maamulka, MCO) ee Behavioral Health Services Only (Kaliya Hab-dhaqanka Adeegyada Caafimaad, BHSO) ee habdhaqanka caafimaadka. Gobollada intooda badan, MCO-da loo qoondeeyay waxay noqon doontaa Daryeel Laysku dubaridday.



Q: Waa maxay noocyada adeegyada ay daboolaan Apple Health (Medicaid)?

A: Adeegyada caafimaadka jidhka iyo hab-dhaqanka ee hoos ku taxan waxa daboolaya Apple Health si loogu taageero qoysaska:

- Codsaday Falanqaynta Hab-dhaqanka
- Dabeecada caafimaadka
 - Bukaankii jifka
 - Bukaankii socodka
 - Wraparound with Intensive Services (Isku dubaridka Adeegyada Degdegga ah, WISE)
 - Daaweynta Substance Use Disorder (Isticmaalka Walaxda, SUD).
 - Adeegyada Maskaxeed
 - Daawaynta Qoyska
 - Waxqabadyada Waalidnimada (Saddexleyda P, Sannadaha La-yaabka leh, PCIT, iwm.)
- Ilkaha
- Dhakhaatiirta/Bixiyaasha
- Qolka Adeega Deg-dega ah
- EPSDT (Baaritaannada caafimaadka wanaagsan iyo daryeelka ka hortagga carruurta ilaa da'da 21)
- Baadhitaanada Indhaha iyo Ookiyaalaha Indhaha
- Daryeelka Caafimaad ee ku Saleysan Jinsiga
- Adeegyada Caafimaadka Guriga
- Adeegyada turjumaanada daryeelka caafimaadka
- Qalabka iyo Agabka Caafimaadka
- Qoraalada
- Qaliinka
- Gadiidka (iyadoo la marayo dilaalka gobolka)

Adeegyada qaar baa xadidan. Wixii macluumaad dheeriya, ka hubi adeeg-bixiyahaaga caafimaad ama la xidhiidh xarunta adeega macmiilka Health Care Authority (Masuuliyiinta Daryeelka Caafimaadka) 1-800-562-3022, gudbinta 15480, ama haddii cunugaagu ka tirsan yahay CCW-AHCC la xidhiidh 1-844-354-9876 ama AHCCTeam@coordinatedcarehealth.com.

Q: Sideen uga helayaa adeegyo caafimaad Washington Apple Health/Medicaid?

A: Marka ilmo-korsashada la dhammeystiro ee aad ku dartid magaca canugaaga Social Security Administration (Maamulka Adeega Bulshada), waxaad la xidhiidhi kartaa Foster Care Medical Team (Kooxda Daryeelka Xanaaneynta Caafimaadka, FCMT) 1-800-562-3022, ext. 15480 si aad uga codsatid ProviderOne la cusbooneysiyyey ee caymiska iyo kaadhka, ama la xidhiidh Lataliyahaaga Caawimada Ilmo-Korsashada.

Dhanka Washington, caawimada qoysaska ilmo korsanaya waxay ku heli karaan caymiskooda qorshaha daryeelka la maareeyey iyagoo maraya Daryeelka Isku-Xidhan ee Washington, Apple Health Core Connections (Xidhiidhada Muhiimka ah ee Caafimaadka, CCW-AHCC). Haddii canugaagu ka tirsan yahay CCW-AHCC, waxay kaala soo xidhiidhi doonaan iimayl iyo teleefan, ama waxaad kala xidhiidhi kartaa CCW-AHCC si toosa 1-844-354-9876 iyo **AHCCTeam@coordinatedcarehealth.com**.

Q: Maxaan ugu baahanahay kaadhka Adeegyada ProviderOne?

A: Kani waa kaadhka aqoonsiga caafimaadka ee canugaaga, kaasoo xaqiijinaya in canugaagu ku jiro caawimada caafimaadka ee Medicaid. Haddii canugaagu ku jiro caymiskaaga gaarka ah, kaadhkani wuxuu hubinayaa inaad bixin lacagta/khidmada (aanad ka bixin kharashaadka jeebkaaga) adeegyada caymiska Medicaid. Haddii canugaagu ku jiro caymiska CCW-AHCC, kaadhka adeegyada ProviderOne ayaa loo isticmaali doonaa caafimaadka ilkaha, ookiyaalaha indhaha iyo gadiidka.

Q: Miyuu kaadhku leeyahay taariikh uu dhacayo?

A: Kaadhka ProviderOne ma leh taariikh uu dhacayo. Maaha daamanad caymis, laakiin wuxuu faa'ido u leeyahay lasocoshada lambarka ProviderOne ka canugaaga.

Q: Ka waran haddii uu leeyahay qaladaad kaadhka Adeegyada ProviderOne?

A: Si degan u hubi kaadhka canugaaga si aad u hubisid in waxkasta oo ku qoran sax yahay. Haddii wax ku qoran kaadhku qaldan yahay ama u baahan yahay in la badelo, wac Lataliyahaaga Barnaamijka Caawimada Ilmo-Korsashada.

Q: Ka waran haddii aan lumiyo kaadhka Adeegyada ProviderOne ee canugayga?

A: Haddii aad lumisid kaadhkaaga, wac FCTM halkan 1-800-562-3022, Ext. 15480 ama lataliyahaaga barnaamijka caawimada ilmo-korsashada.

Q: Canugaygu ma heli karaa caymiska gaarka ah iyo Washington Apple Health/Medicaid?

A: Waxa lagugu dhiirigalinayaa inaad ka diwaangalisid canugaaga caymiskaaga gaarka ah. Caymiskaaga gaarka ah waa ka koobaad halka Washington Apple Health/Medicaid ka labaad. Fadlan ogeysii FCMT haddii aad haysatid caymis kale oo caafimaad. Wac 1-800-562-3022, ext. 15134. HCA ayaa xaqiijin doonta caymiskaaga koobaad.

Macluumaad dheeriya oo khuseeya Medicaid:

Daryeelka Ilkaha

Helitaanka dhakhtarka ilkuhu way adkaan kartaa. Haddii aad uga baahan tahay caawin helitaanka dhakhtar ilkaha ah ama gadiidka lagu tagayo dhakhtarka ilkaha, wac Khadka Kaalmada Caafimaadka ee liiska dhakhaatiirta ilkaha ee deegaankaaga ee qaata Washington Apple Health. Haddii aad ka helaysid adeegyo CCW-AHCC, barnaamijku wuxuu kaa caawin doonaa helida dhakhtarka ilkaha, wac 1-844-354-9876.

ABCD – Daryeelka Ilkaha ee dhalaanka iyo caruurta yaryar

Access to Baby and Child Dentistry (Helitaanka Caafimaadka Ilkaha ee Dhalaanka iyo Caruurta, ABCD) waa barnaamij caafimaadka ilkaha ah oo loogu talagalay caruurta jirta ilaa lix sano. Macluumaadka waxa laga helayaa <http://abcd-dental.org>.

Helida Daawooyinka

Ma bixin doonta xadiga lacagta kaagasoo hagaagay daawooyinka ee Washington Apple Health. Waxa laga yaabaa inaad gashid kharashaadka daawooyinka aanay daboolin Washington Apple Health. Digtoorka farmasigaaga ayaa kuu sheegi kara haddii daawada la bixiyey.

Baadhitaanada Indhaha iyo Ookiyaalaha Indhaha

Baadhitaanada sanadlaha ee indhaha waxa loogu daray caymiska sida ookiyaalaha indhaha iyo badelida ookiyaalaha. Haddii ay jirto xaalad caafimaad, canugaaga oo u dhaxeeya 6 iyo 20 sano wuxuu heli karaa baadhitaano badan.

Adeegyada Caafimaadka Maskaxda

Adeegyada baahiyaha caafimaadka maskaxda ee canugaaga waxa daboolay labadaba ProviderOne iyo Daryeelka Isku-Xidhan ee Washington – Apple Health Core Connections (Xidhiidhaha Muhiimka ah ee Caafimaadka, CCW-AHCC). Fadlan la xidhiidh bixiyaha caymiskaaga koobaad si uu kaaga caawiyo baahidan. Haddii canugaagu ka diwaangashan yahay CCW-AHCC, waxay leeyihiin koox iskuduwayaal daryeel caafimaad ah oo dadaal badan, oo ay ku jiraan shaybaadhayaasha caafimaadka hab-dhaqanka. Shaqaalaha AHCC waxay kaa caawin karaan inaad aqoonsatid adeegyada haboon iyo adeeg-bixiyayaasha, kugu xidhi karaan dhaqamada ku saleysan cadeynta, kusiin karaan tababar iyo caawimo, kaa caawin karaan dejinta nidaan daryeel, baadhista khataraha isbiimeynta, isku-buuqa, warwarka, isticmaalka daroogada waxayna kaa caawin karaan inaad ka faa'idaysatid caymiska Apple Health. Wac 844-354-9876 ama iimayl u dir AHCCTeam@coordinatedcarehealth.com oo weydiiso Daryeelka Caafimaadka ee Isku-Xidhan.

Q: Badanka miyey dhacdaa in canug u baahdo adeegyada caafimaadka maskaxda?

A: Tiro-koobka Xulafada Qaranka ee Xanuunada Maskaxda, lasoo saaray Sabteembar 2019, ayaa xusaya in mid ka mida lixdii dhalinyaro ah, da'da 6 ilaa 17, waajaho cillad caafimaadka maskaxda ah sanadkiiba.

Q: Ka waran haddii canugaagu u baahan yahay inuu la kulmo xirfadle caafimaadka maskaxda ah kadib korsashada?

A: Marka aad u furtid qalbigaaga iyo gurigaagaba adoo korsanaya canug, waxaad waajihi doontaa farxado iyo caqabado khaasa intaad korinaysid canugaaga. Inkastoo adeegyada caafimaadka maskaxda aan loo baahan ilaa sanado kadib markay korsashadu dhacday mooyee, marmar canugaagu wuxuu u baahan karaa inuu la kulmo xirfadle caafimaadka maskaxda ah iyadooy ugu wacan tahay caqabadaha shucuureed, hab-dhaqan ama korniin. Waxaad ogaan kartaa arimahaasi marka canugaagu korayo, gaar ahaan sanadaha barbaarnimada. Waxa markasta faa'ido badan in la xaliyo arimaha ku badan dhammaan caruurta, iyo arimaha aad ula xidhiidha gaar ahaan caruurta la korsanayo. Badanka, adeegyada caafimaadka maskaxda ee kadib ilmo-korsashada waxa bixiya caymiskaaga koobaad, Medicaid (ProviderOne ee Washington), ama adeeg hore loo ansixiyey iyadoo la marayo barnaamikka caawimada ilmo-korsashada.

Q: Goorma ayaan u raadinayaa adeeg-bixiye caafimaadka maskaxda ah canugayga?

A: Kala hadal xirfadlahaaga daryeelka caafimaadka canugaaga haddii aad walaac ka qabtid qaabka canugaagu uga dhaqmo guriga, dugsiga ama asxaabta. Caawimo degdega oo laga helo lataliye xirfad leh ama dhakhtar waxay wax ka qaban kartaa dhibka koobaad kahor intaanu halis noqon. Tusaale, waxaad raadsan kartaa adeegyada caafimaadka maskaxda haddii canugaagu leeyahay:

- Calaamad hoos u dhac dhibcaha dugsiga ah.
- Warwaraayey ama ka murugsan yahay waxyaabaha.
- Dhib ka haysto seexashada, uga kacaya hurdada si joogto ah ama leh riyooyin joogto ah.
- Murugaysnaa, walwalsanaa ama xanaaqsanaa.
- Kalsooni daro badan.
- Aan aqoodin inuu latacaalo dhibaatooyinka maalinlaha ah.
- Uu bilaabay daroogooyinka ama alkahoosha.
- Uu bilaabay inuu wax isyeelo.
- Uu bilaabay fikirada ama hab-dhaqanada aan wanaagsaneyn.
- Isbadel caadooyinka cuntada ah.
- Ka hadhista asxaabta, qoyska iyo ciyaaraha joogtada ah.
- Badanka ka cabanaayo astaamaha jidheed ee la xidhiidha shucuurta, sida calool xanuunka, madax xanuunka, daal, iwm.
- Hadalada sida, “Waxaan rajeyn lahaa inaan dhinto,” ama “Waxaan rajeyn lahaa inaan seexan karo oo aanan kicin.”
- Isbadel degdega oo hab-dhaqanka, ciyaaraha, kooxaha bulshada (loo yaqaan tilmaamaha macquulka ah ee tahriibinta binaadamka).

Q: Sideed ugu heli kartaa xirfadle caafimaadka maskaxda ah canugaaga?

A: Kala hadal cabashadaada dhakhtarka canugaaga, kaasoo kaa siin kara fikrad oo qiimeyn kara canugaaga si uu meesha uga saaro xaalad caafimaad oo kasta. Dhakhaatiirta ugu badan waxay la leeyihiin xidhiidho shaqeynaya khubaro caafimaadka maskaxda ah sida khubarada cilmi-nafsiga canuga ama shaqaale bulsho oo shaybaadha, si ay u awoodaan inay kuugu gudbiyaan adeeg-bixiye caafimaadka maskaxda ah oo deegaankaaga ah isla markaana caawinaya baahiyaha canugaaga. Sidoo kale, waxaad weydiin kartaa asxaabta, qoyska ama culimada xirfadlayaasha aqoonta leh ee ay

kugula taliyaan. Haddii loo baahdo, shirkadaada caymiska caafimaadka ayaa ku siin karta liiska adeeg-bixiyayaasha caafimaadka maskaxda ah ee shabakadaada.

Q: Sideed ugu doori kartaa xirfadle caafimaadka maskaxda ah canugaaga?

A: Waxa jira noocyo badan oo qaabab daaweyn kala duwan ah iyo xirfadlayaal bixinaya adeegyada caafimaadka maskaxda, laakiin waxa muhiima inaad dooratid xirfadle garanaya arimaha khaaska ah ee qoyska ilmo-korsanaya waajahayo, inay dhaqan ahaan ka warqabaan kana jawaabayaan, oo ay anfacayaan canugaaga kaana qeybgalinaya daaweynta. Caadiyan, xirfadlahani wuxuu noqonayaa mid ka mida dhowr qeybood oo xirfadlayaasha ah:

- **Dhakhtarka Dhimirka**
Dhakhtar caafimaad oo leh tababar takhasus baadhitaanka iyo daaweynta xanuunada maskaxda iyo shucuurta ah. Dhakhtarka dhimirku wuxuu u qori karaa daaweyn, laakiin badanka lama taliyaan bukaanada.
- **Dhakhtarka Dhimirka ee Canuga/Barbaarka**
Dhakhtar caafimaad oo leh tababar takhasus baadhitaanka iyo daaweynta dhibaatooyinka shucuurta iyo hab-dhaqanka caruurta. Dhakhtarka dhimirka ee canuga iyo barbaarintu wuxuu sidoo kale qori karaa daaweyn, haseyeeshee, ma bixiyo daaweynta cilmi-nafsiga ah.
- **Shaqale Dhakhtarka Dhimirka ama Caafimaadka Maskaxda**
Shaqale diwaangashan oo haysta shahaadada heerka labaad iyo tababar takhasus baadhitaanka iyo daaweynta xanuunada maskaxda iyo shucuurta ah.

Waxa intaas dheer, dhakhtarkaaga daryeelka asaasiga ah, kalkaalisada dhakhtarka ama shaqaale (iyadoo ku xidhan tahay gobolkaaga) ayaa badanka ku haboon u qorista daaweynta.

Xirfadlayaashan caafimaadka maskaxda ee soo socda waxay bixin karaan qiimeynta cilmi-nafsi iyo daaweyn, haseyeeshee, guud ahaan ma qori karaan daawooyinka (inkastoo gobolada qaar ogolanaayaan):

- **Dhakhtarka Cilmi-Nafsi ee Shaybaadhka** – Dhakhtar Cilmi-Nafsi oo ka haysta shahaadada cilmi-nafsiga barnaamijka la ansixiyey/aqoonsan yahay oo cilmi-nafsiga ah. Dhakhaatiirta cilmi-nafsiga waxa loo tabobaraa inay sameeyaan baadhitaano oo bixiyaan daaweyn gaara iyo mid wadar ahba.

Xirfadlayaashan caafimaadka maskaxda ee soo socda waxay bixin karaan latalin, haseyeeshee, ma qori karaan daaweyn:

- **Shaqale Bulsho oo Shaybaadhe ah** – Lataliye ka haysta shahaadada heerka labaad ee cilmiga bulshada barnaamij la aqoonsan yahay. Loo tabobaray inuu sameeyo baadhitaano, bixiyo latalin gaara iyo wadar ahba, oo bixiya maamulida kiiska iyo ololeynta; badanka laga helo cisbitaalka.
- **Xirfadle Lataliye ah oo Haysta Shati** – Lataliye haysta shahaadada heerka labaad ee cilmi-nafsiga, latalinta ama aqoon la xidhiidha. Loo tababo baray inuu baadhdo oo uu bixiyo latalin gaara iyo mid wadar ahba.
- **Lataliye Caafimaadka Maskaxda ah** – Lataliye haysta shahaadada heerka labaad iyo dhowr sano oo khibrada shaqo ee shaybaadh kormeer leh ah. Loo tababo baray inuu baadhdo oo uu bixiyo latalin gaara iyo mid wadar ahba.

Q: Maxaa ay tahay inaad raadisid markaad la hadlaysid xirfadle caafimaadka maskaxda ah?

A: Weydii su'aalaha la xidhiidha waxa aad ka raadinaysid dhakhtarka. Waxa macquulnaad rabtid inaad ogaatid siday ula shaqeeyaan bukaanka, dabcigooda, inay ku siinayaan warbixino adiga ama cida u daboolaysa haddii aan la helayn. Waxaad weydiin kartaa haddii ay leeyihiin takhasus, sida latalinta qoyska ama canuga, tababarka argagaxa, naxdinta iyo dhibaataada, aqoon ama khibrad la shaqeynta qoysaska ilmo korsada ah. Waxa macquula inaad rabtid inaad ka siisid dhakhtarka sharaxaad kooban cabashooyinkaaga oo aad sharaxdid xaaladaha qoyskaaga sida ilmo-korsasho furan, haddii canugaagu waahagayo xadgudub, daryeel, arimo xidhiidh, dibu dhac korniin iyo wixii la mida.

Inkastoo khibrada iyo waxbarashadu muhiim yihiin, waxa sidoo kale muhiima in la raadiyo lataliye canugaagu ku dareemayo nafis inuu la hadlo. Raadi midka leh aqoonta iyo khibrada ugu haboon, nidaamka ugu wanaagsan ee uu ku caawinaayo canugaaga ku jira xaaladaasi markaa iyo qiimeynta ka qeybgalka iyo caawimada.

Q: Sidee ayaa lacagta loo bixinayaa markaad u dooratid adeeg-bixiye caafimaadka maskaxda ah canugaaga?

A: Fiiri in xirfadlaha caafimaadka maskaxda ee aad dooranaysaa aqbalaayo caymiskaaga koobaad ama caymiska Medicaid oo weydii lacagtooda khidmada ah. Haddii aanad lahayn caymis gaara, caymiskaaga waa la xadidayaa ama haddii dhakhtarku aanu aqbalin caymiskaaga ama Medicaid, hubi in heshiiskaaga caawimada ilmo-korsashadu bixinaayo daaweynta dhimirka bukaan socodka iyo latalinta kale. Haddii ay sidaasi tahay, la xidhiidh lataliyahaaga barnaamijka caawimada ilmo-korsashada kahor intaanad bilaabin adeega oo codso Ansixinta Hore ee Adeegyada.

Kuwa ka diwaangashan CCW-AHCC, kahor ka faa'idaysiga adeegyada ogolaanshaha hore, fadlan wac 844-354-9876 ama iimayl u dir AHCC halkan **AHCCTeam@coordinatedcarehealth.com** wixii caawimo helitaanka adeeg-bixiye Medicaid ah.

Q: Waa maxay Ogolaanshaha Hore ee Barnaamijka Caawimada Ilmo-Korsashada ee nidaamka Adeegyada?

A: Markaad wacdid lataliyaha barnaamijka caawimada ilmo-korsashada oo aad codsatid ogolaanshaha hore, waxaa lagugula talin doonaa heerarka gobolka, adeegyada la daboolay waxaana laguusoo diri doonaa foomka ogolaanshaha hore. Waa inaad dhammeystirtaa qeybta koobaad ee foomka, adeeg-bixiyaha aad dooratay waa inuu dhammeystiraa qeybta labaad. Marka foomka ay saxeexaan waalidka(waalidiinta) iyo adeeg-bixiyuhu, adeeg-bixiyuhu wuxuu usoo celinayaa nuqulka saaxan waalidka kaasoo u diri doona foomka lataliyaha caawimada ilmo-korsashada. Caawimada ilmo-korsashadu waxay u siin doontaa lacagta adeeg-bixiya toos. Adeegyada u baahan ogolaanshaha hore waxa ku jira dhaqamada ku saleysan cadeynta iyo latalinta gaarka ah.

Dhaqamada ku saleysan cadeynta, waxa laguusoo diri doonaa macluumaadka khuseeya daaweynta xanuunada ee ay heli karaan caruurtaadu marka loo fiiriyo da'dooda. Macluumaadka waxa ku jiri doonaa qorista daawooyinka adeegyada iyo sida loo doorto adeeg-bixiye. Adeegyada hadda la siiyo qoysaska helaya caawimada ilmo-korsashada waxa ku jira: Kor u Qaadista Xidhiidhada Koobaad, Sanadada Cajjibaka ah, Daaweynta Xidhiidhka Waalidka iyo Canuga, Daaweynta Qoyskam, Triple P, SafeCare,

iyo Adeegyada Ilaalinta Qoyska. Adeegyo badan oo ku saleysan cadeyn ayaa waxa daboolaa Medicaid. Laxidhiidh Apple Health si aad u qorsheysid inaad ogaatid waxa la daboolay una heshid adeeg-bixiye.

Kadib markaad dhammeystirtid adeega dhaqamada ku saleysan cadeynta, waxa lagugula talin karaa in qoyskaagu sii wado latalinta gaarka ah. Labada nidaamka waxay ka qeyb yihiin nidaamkan soo socda ee codsiga ogolaanshaha hore.

Q: Ka waran haddii canugaagu u baahan yahay barnaamijka daaweyn guriga kadib korsashada?

A: Marka loo eego WAC 110-80-0250, barnaamijka caawimada ilmo-korsashadu ma bixin karo lacagta daaweynta guriga. Haddii aad codsatid adeegyada daaweynta guriga oo ay keentay:

- Xanuunka maskaxda ee canugaaga, fadlan wac shirkada caymiskaaga koobaad ama qorshaha Apple Health.
- Baadhitaanka canugaaga ee jidhka, maskaxda, korniinka, naafada caqliga ama shucuurta, fadlan wac Developmental Disabilities Administration (Maamulka Naafada Korniiinka, DDA) si aad u go'aamisid in canugaagu ku haboon yahay adeegyada.
- Baahi aan ka ahayn daaweynta xanuunada maskaxda ama naafada korniinka, fadlan wac adeegyada daryeelka caruurta ee DCYF xafiiska Daryeelka Caruurta.
- Inta lagu jiro mushkilada ama xaaladaha adag, waxaad u gudbin kartaa barnaamijka Wrap Around Intensive Service (Adeega Gargaarka Caruurta, WISE) ay maamulaan caafimaadka habdhaqanka iyo soo kabashada, **www.hca.wa.gov/health-care-services-supports/behavioral-health-recovery/child-and-youth-behavioral-health**.

Haddii canugaaga ka diwaangashan yahay CCW-AHCC oo aad aamisan tahay in canugaagu u baahan yahay adeegyada caafimaadka habdhaqanka, oo ay ku jiraan guriga/bukaan jifka, fadlan wac AHCC halkan 1-844-354-9876 ama **AHCCTeam@coordinatedcarehealth.com** wixii caawimo helitaanka adeegyada xuquuqda canugaaga ah.

Waxbarasho

Q: Miyey jiraan barnaamijyo waxbarasho oo si gaara loogu diyaariyey canugayga kadib dugsiga sare?

A: Dhallinyarada la-korsaday da'da 14 ka dib waxay sii wadi karaan u-qalmitaanka Barnaamijka Waxbarashada ee Ardayda Dalbanaya Kulliyadda.

Waxay dhaqan gashay Octoobar. 19, 2017, dhalinyarada la-korsaday inta u dhaxaysa 14 sano iyo 18 sano heshiiska taageerada ilmo-korsashada ee Washington waxay sii wadi doonaan u-qalmitaanka deeqda waxbarasho ee Ardayda Dalbanaya Kuliyada. Si loo go'aamiyo in cunugaagu uu hore ugu qalmay deeqdan waxbarasho, kala xidhiidh Golaha Waxqabadka Ardayga Washington 1-888-535-0747 oo dooro doorashada 1 ama iimayl collegebound@wsac.wa.gov.

Si aad ugu qalanto deeqda waxbarasho ee Dalabka Kulliyada, ardaydu waa inay u qalmaan qado bilaash ah ama qiimo jaban ama ay ku tiirsan yihiin sida ku xusan cutubka 13.34 RCW. Carruurta ku tiirsan waa inay ku jiraan darajooyinka 7 ilaa 12 ama ay u dhexeeyaan da'da 18 iyo 21 oo aanay ka qalin jabin dugsiga sare, ama aanay dhammayn shahaado u dhiganta dugsiga sare. Si ay xaq ugu yeeshaan deeqda waxbarasho ee Dalabka Kulliyada marka ay ka qalinjabiyaan dugsiga sare ama ay helaan shahaadada u dhiganta dugsiga sare, ardaydu waa inay lahaadaan dakhli kan qoyska u dhigma ama ka hooseeya 65% dakhliga qoyska waana inay si guul leh isku diwaangaliyaan waxbarashada dugsiga sare ka dib. Si aad u hesho shuruudo dheeraad ah oo u-qalmashada iyo macluumaadka ku saabsan habka codsiga deeq-waxbarasho ee Dalabka Kulliyada, fadlan booqo www.wsac.wa.gov/college-bound.

Q: Miyey jiraan barnaamijyo dheeriya oo u diyaara canug kasta kadib dugsiga sare?

A: Barnaamijka Education and Training Voucher (Kaabista iyo Tababarka Waxbarashada ee Dhalinyarta La-korsaday, ETV) waxa uu diyaar u yahay dhalinyarada ku jirta daryeelka korinta ee la qaatay markay gaadheen da'da 16 ama ka dib. ETV waxa ay siisaa kaalmo dhaqaale dhallinta la korsaday ee xaqa u leh si ay u galaan kulliyad, jaamacad, koolaj xirfadeed ama u bartaan farsamo la aqoonsan yahay. Barnaamijka ETV wuxuu ardayda ka caawiyaa dadaalkooda si ay u helaan kaalmada maaliyadeed oo ay isku diwaangaliyaan

kulliyadda. Abaalmarinta ugu badan ee ETV waa \$5,000 sanad dugsigeedkiiba.

Abaalmarintu waa mid gaar u ah arday kasta waxayna ku salaysan tahay kharashka qaacidada imaanshaha ee ay dejisay kulliyadda ay doorteen iyo baahi kasta oo aan la daboolin oo ay ka heli karaan abaalmarintooda kaalmada maaliyadeed.

- ETV waxaa laga isticmaali karaa dalka oo dhan.
- Dhallinyarada ka qaybqaata oo hela lacagta ETV ka hor da'da 21 waxay sii wadi karaan inay helaan ETV ilaa da'da 23.

Habraca Codsiya

Codsiyada ETV waxay ku jiraan wabsaaydada dhalinyarada www.independence.wa.gov ama waxaad codsan kartaa nuqul daabacaad caadi ah adigoo kala xidhiidha shaqaalaha barnaamijka ETVWASH@dshs.wa.gov:

- Codsiya khadka tooska ah waa codsade markii ugu horeysay oo kaliya.
- Codsiya cusboonaysiinta waxaa loogu talagalay codsadaayaasha soo laabanaya ee xaqa u leh.
- Codsiya bilowga/kasbashada dhibcaha waxaa loogu talagalay ardayda dhiganta dugsiga sare, ee loo ogolaaday inay ku jiraan barnaamijka bilowga soconaya oo qaadanaya koorsooyin heer koolaj ah.
- Wareega codsiya mudnaantu wuxuu bilaabmaa Jeeniwari 1 wuxuuna dhammaanayaa Abriil 30 sannad kasta. Dhammaan codsiyada la helo wixii ka dambeeya Abriil 30 waxaa la gelin doonaa liiska sugitaanka waxaana lagu abaalmarin doonaa oo lagu salayn doonaa lacagaha la heli karo. Wareega codsiya wuxuu xidhmi doonaa Julaay 31. Wax codsi ah lama aqbali doono taariikhdan ka dib.
- Dhalinyaradu waa inay buuxiyaan Free Application for Federal Student Aid (Codsiya Bilaashka ah ee Gargaarka Ardayga Federalka, FAFSA) sanad kasta ama wax yar ka dib Oktoobar 1. Sida ku xusan hagaha fadaraalka, dhalinyarada la korsaday markay 13 jirsadaan ama ka dib waxaa loo arkaa inay u madax banaan yihiin ujeedooyinka codsiya gargaarka maaliyadeed ee dawlada fadaraalka. Si kastaba ha ahaatee, kulliyadaha ayaa laga yaabaa inay u baahdaan xaqiijin dheeraad ah iyo codsiya xaqiijinta goorta korsashada ay dhacday.
- Dhalinyaradu waa inay dib u codsadaan barnaamijka sanad walba.



Kharashaadka Ku Haboon

Marka ardaydu helaan abaal-marintooda ETV waxa laga yaabaa inay codsadaan caawimada soo socota:

- Kharashka Waxbarashada - Dhammaan noocyada kale ee caawinta maaliyadeed waa in marka hore lagu dabaqaa waxbarashada.
- Buugaagta iyo agabka.
- Guriyeynta - Lacagta kirada, bixinta kirada bilaha ah iyo adeegyada laydhka iyo biyaha.
- Raashinka iyo alaabta nadaafadda shakhsi ahaaneed.
- Gaadiidka - Kaadhka baska, caawinta caymiska baabuurka, gaaska, dayactirka iyo hagaajinta.
- Daryeelka cunuga.

Shuruudaha iyo Siiwadida Kaqeybgalka Joogtada ah ee Barnaamijka

Dhallinyarada waxaa looga baahan yahay inay dhammaystiraan Heshiiska Ka-qaybgalka ETV, kaas oo qeexaya mas'uuliyadahooda ka-qaybgale ETV ahaan. Shuruudaha ugu muhiimsan waxaa ka mid ah:

- Dhalinyaradu waxay u baahan doonaan inay buuxiyaan shuruudaha Satisfactory Academic Progress (Ku Qanacsanaanta Horumarka Waxbarashada, SAP) ee machadkooda, inay haystaan 2.0 GPA ama ka wanaagsan oo ay muujiyaan inay horumar ka samaynaayan heerka ama shahaado.
- Dhalinyaradu waa inay isdiwaangaliyaan ugu yaraan marka kala badh wakhtigu gaadho ama ka badan, taasoo la macno ah lix ama ka badan dhibcaha.
- Dhalinyaradu waa in lagu diwaan galiyo ugu yaraan hal koorso koolajkiiba 100-ka heer ah waana in ay xaq u yeeshaan in ay helaan kaalmo lacageed.
- Dhalinyaradu waa inay soo gudbiyaan jadwalkooda fasalka bilawga xilli kasta iyo koobiga natiijooyinka aan rasmiga ahayn dhamaadka xilli kasta.

Macluumaad dheeraad ah ka daalaco: www.independence.wa.gov ama kala xidhiidh shaqaalaha barnaamijka 1-877-433-8388 ama kathy.ramsay@dcyf.wa.gov.

Kharashaadka Gagabaynta Ilmo-korsashada

Q: Sideen ku heli karaa kaalmada gagabada kharashaadka ilmo-korsashada?

A: Kharashaadka ilmo-korsashada waa kharashyo hal mar ah oo la galay si loo dhamaystiro ilmo-korsashada. Waxa ku jira khidmadaha qareenka, khidmadaha xaraynta maxkamadda, kharashka jidheed iyo kharashka waxbarashada guriga. Si aad u hesho magdhawga kharashaadkan, waa inaad codsataa ka hor inta aan la dhamaystirin ilmo-korsashada. Kharashka ugu badan ee dib loo celin karo waa \$1,500 cunug kasta. Lacag-celinta waxay dhacdaa marka korsashada la dhammeeyo oo lagu saleeyo kharashyada dhabta ah ilaa inta lagu cayimay heshiiska.

Q: Maxaa looga baahan yahay caddaynta lacag bixinta?

- A:** Ka dib marka ilmo-korsashada la dhammeeyo, kharashyadaada la oggolaaday ayaa dib loo soo celin doonaa markaan helno kuwan soo socda:
- Nuqul saxeexan oo ah amarka ilmo-korsashada
 - Nuqul ka mid ah biilasha oo muujinaya inaad ku bixisay adeegga aad ku sheegtay foomka
 - Rasiidka saxda ah ee adeegyada lacag bixinta, ama
 - Nuqul jeeg la joojiyay.

Tababar

Q: Ma ka qayb qaadan karaa tababarada si aan si fiican ugu fahmo baahiyaha gaarka ah ee cunugayga?

A: Qoyskaagu waxa ay xaq u leeyihiin in ay ka qaybqaataan dhammaan fursadaha tababbarka daryeelaha ee ay bixiso Isbahaysiga Hagaajinta Daryeelka Carruurta www.allianceforchildwelfare.org, iyo Daryeelka Isku-dubbaridan ee Washington- Apple Health Core Connections (Xidhiidhaha Muhiimka ah ee Caafimaadka) www.coordinatedcarehealth.com. Wixii faahfaahin ah kala xidhiidh la taliyaha barnaamijka taageerada ilmo-korsashada.

CCW-AHCC waxay haysaa tiro tababaro onlaayn ah oo diyaar u ah waalidiinta waxayna sidoo kale siisaa tababaro bulshada dhexdeeda ah. Macluumaad dheeraad ah, kala xidhiidh CommunityEducation@coordinatedcarehealth.com.

Macluumaad Dheeraad ah

Q: Xaq ma u leeyahay dhageysi haddii aanan ku raacsanayn go'aanka uu barnaamijku gaadhay?

A: Waxaad ka codsan kartaa dhageysi ka hor Administrative Law Judge (Garsooraha Sharciga Maamulka, ALJ) haddii mid ka mid ah go'aamada soo socda uu sameeyay barnaamijku:

- U qalmida bilowga hore ee cunugaaga ee barnaamijka taageerada ilmo-korsashada waa la diiday.
- Lataliyaha barnaamijka ayaa ku guuldareystay inuu si macquul ah uga jawaabo codsi qoraal ah ama codsiga adeegyada.
- Codsiga lagu beddelayo heerka lacag bixinta ama adeegga heshiiska waa la diiday.
- Go'aan lagu kordhinayo ama lagu dhimayo heerka lacag bixinta bil kasta waxaa la sameeyay ogolaanshahaaga la'aanteed.
- Codsiga kharashka dhamaystirka ilmo-korsashada waa la diiday.
- Cunugaaga waa laga saaray barnaamijka mana aadan ogolayn.

Q: Sideen u codsadaa dhageysi?

A: Waxaa lagugu ogeysiin doonaa qoraal ku saabsan go'aamada barnaamijka waxaana lagugu wargelin doonaa xaqa aad u leedahay dhageysiga, wakhtiga kama dambaysta ah ee codsiga dhageysiga, ha noqoto codsigaaga dhageysi qoraal ah, meesha aad codsiga u diri karto iyo haddii aad codsiga ku sameyn karto hadal ahaan. Waxa kale oo aad qoraal ugu diri kartaa Office of Administrative Hearings (Xafiiska Dhagaysiyada Maamulka, OAH) halkan:

Office of Administrative Hearings (Xafiiska Dhagaysiyada Maamulka)
PO Box 42489
Olympia, WA 98504-2489

Dhammaan xafiisyada OAH waxay leeyihiin lambarro lacag-la'aan ah. Way ficantahay inaad wacdo xafiiska kuugu dhow goobtaada. Fadlan dib u eeg wabsaaytka, www.oah.wa.gov, Administrative Hearings office (Xafiiska Dhageysiga Maamulka) ee kuugu dhow.

Q: Maxaa dhacaya ka dib marka codsado dhageysi?

A: Office of Administrative Hearings (Xafiiska Dhageysiga Maamulka, OAH) wuxuu muddaynayaa dhageysiga oo wuxuu soo diraa Ogeysiiska Dhageysiga oo wata taariikhda, waqtiga iyo goobta dhageysiga. Ogeysiiska waxaa ku lifaaqan xog muhiim ah oo ku saabsan dhageysiga. Si gaar ah u fiirso warqada iskulaaban ee ku lifaaqan. Dhamaan wada akhri. Si degan u akhri.

Marka xigta, wakiilka dhegeysiga ee ka socda DCYF waxa uu la xidhiidhi doonaa qofka codsaday dhegeysiga iyo cid kasta oo kale oo danaynaysa si ay uga hadlaan kiiska oo ay isku dayaan in ay xaliyaan khilaafka. Lambarka taleefanka wakiilka DCYF wuxuu ku qoran yahay Ogeysiiska Dhageysiga. Waxaad sidoo kale bilaabi kartaa xidhiidh.

Haddii aad rabto inaad dib u eegto faylkaaga oo aad sameyso nuqulo dhukumanti ah oo aad aaminsan tahay inay khuseeyaan dhageysiga, waa inaad wacdaa wakiilka DCYF si aad u diyaarsato wakhti aad taas ku samayso.

Mararka qaarkood Administrative Law Judge (Garsooraha Sharciga Maamulka, ALJ) ayaa jadwal u samayn doona shir dhegaysi ka horeeya ka caadiga ah. Inta badan waxaa lagu sameeyaa telefoon. Haddi ALJ uu qabto shir ka horeeya kan caadiga ah, tilmaamo ku saabsan waxa laga filan karo ayaa lagu dari doonaa ogeysiiska jadwalka.

Q: Maxaa dhacaya haddii aan rabo qof i matalaya?

A: Waxaa laga yaabaa inaad qabsato qareen aad ka bixiso kharash adiga kuu gaar ah ama waxaad adigu matali kartaa naftaada. Kaalmo sharci oo bilaash ah iyo mid jaban ayaa laga heli karaa <http://oah.wa.gov> bogga shaashada hore ee ay ku qorantahay, "Sideen ku sameeyaa ... Raadi Kaalmo Sharci?" Haddii aad rabto in lagu matalo, wakiilkaaga waa inuu joogaa dhageysiga.



Q: Marka ilmo-korsashada la dhammeeyo, ma la xidhiidhaa Social Security Administration (Maamulka Adeega Bulshada)?

A: Haa, marka cunugaaga la korsado, waa inaad la xidhiidhtaa Social Security Administration (Maamulka Adeega Bulshada) si aad u ogeysiiso in ilmo-korsashada la gabagabeeyay. Maamulka ayaa dib u cusboonaysiin doona diiwaanka cunuga oo ay kujiraan macluumaadka aqoonsiga cusub oo waxay soo saari doonaan kaadh cusub.

Marka aad u cusboonaysiiso macluumaadka Social Security Administration (Maamulka Adeega Bulshada) ee cunugaaga, fadlan ogeysii Medicaid iyo la taliyahaaga taageerada ilmo-korsashada.

Q: Waa maxay dhibcaha cashuurta ilmo-korsashadu?

A: Waxa laga yaabaa inaad qaadato dhibcaha cashuurta ilmo-korsashada. Kababka canshuurta ee ilmo-korsashada waxaa ka mid ah labadaba canshuur celinta kharashyada korsashada u qalma ee la bixiyo si loo korsado ilmo u qalma, iyo ka reebista dakhliga ee kaalmada korsashada ee uu bixiyo shaqaalaysiiyuhu.

La tasho Internal Revenue Service (Adeegga Dakhliga Gudaha, IRS) ama lataliyahaaga cashuuraha si aad u hesho macluumaad qoto dheer oo gaar ah.

Q: Miyaa la iiga baahan yahay in aan ogeysiyo Taageerada Ilmo-korsashada haddii aan guuro?

A: Haa, waa inaad qoraal ku ogeysiisaa lataliyahaaga barnaamijka taageerada ilmo-korsashada si aad u ilaaliso adeegyada barnaamijka sida caafimaadka iyo lacagta kaashka ee billaha ah. Adeegga Boostada Mareykanka uma soo gudbin doono lacagahaada kaashka ah ee bisha. Haddii aad si toos ah u haysato kayd oo aad guurto adoon ogaysiin la taliyahaaga lacagta kaashka ee bilaha ah waxa lagu hayn karaa ilaa ciwaanka cusub laga helayo.

Marka Laga Guurayo Gobolka

Q: Goorma ayuu daboolista Medicaid ka bilaabmayaa gobolkayga cusub?

A: Dhammaan carruurta ka qaybqaata barnaamijka taageerada ilmo-korsashada waxay xaq u leeyihiin gargaar caafimaad iyada oo loo marayo Medicaid. Haddii qoysku ay degan yihiin meel ka baxsan Gobolka Washington oo ay helayaan kababka Kaalmada ilmo-korsashada ee Federaalka IV-E, Medicaid waxaa bixiya gobolka la degan yahay. Go'aanka Federaalka IV-E wuxuu ku qoran yahay heshiiska taageerada ilmo-korsashada. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan xaaladdan, fadlan weydii la-taliyahaaga marka aad la xidhiidho si aad ugala hadasho arinta guuritaanka.

Haddii cunugu aanu u qalmin kababka Caawinta ilmo-Korsashada Fadaralka IV-E caawimooyinka Medicaid waxaa si toos ah looga bixin doonaa Gobolka Washington ama gobolka deganaanshaha haddii gobolkaasi leeyahay daboolista Medicaid. Kababka Medicaid ee lagu daray Qorshaha Medicaid ee Washington, laakiin laga reebay ama xaddiday Qorshaha Medicaid ee gobolka dadka deggan ayaa la heli karaa iyada oo loo marayo barnaamijka Medicaid ee Gobolka Washington. Marka la codsado, shaqaalaha Barnaamijka Taageerada ilmo-korsashada ee Gobolka Washington ayaa fududayn doona la xidhiidhka gobolka deganaanshaha si ay uga caawiyaan helitaanka caymiska Medicaid. Caymiska Medicaid ee Gobolka Washington wuu sii socon doonaa ilaa caymiska uu fidinayo gobolka deganaanshuhu.

TALO: Haddii ilmahaagu u baahan yahay daawo bille ah, hubi inaad hesho wax kugu filan oo aad ku gaadho dhammaadka bisha.

Caawimooyinka/Adeegyada Bulshada

Q: Sideen ku helaa kooxaha taageerada?

A: Kooxaha taageerada ee u adeega ilmo-korinta, mas'uulka, ilmo-korinta iyo qaraabada daryeel bixiyaasha ayaa laga samaynayaa gobolka oo dhan. Macluumaad ku saabsan kooxahan, la xidhiidh xafiiska DCYF ee degaankaaga ama khadka Taageerada Waalidka iyo Daryeelaha Ilmo-korinta 1-800-301-1868.

Waxyaabaha ay tahay inaad xasuusnaato:

Markaad bedesho ciwaanada, ha ahaato gobolka ama aad u guurayso gobol kale, waa muhiim inaad ogaysiiso lataliyahaaga barnaamijka taageerada ilmo-korsashada. *Haddii cunugaagu 18 jirsado oo uu weli ku jiro dugsigu, waxa laga yaabaa inay u qalma kordhinta. Wac la taliyaha barnaamijka taageerada ilmo-korsashada wixii faahfaahin ah.*



Khayraadka Onlaaynka

Wabsaaytka Xarunta Daawada Ilmo-korsashada

Jaamacadda Washington, khayraadkeena caafimaadka iyo arrimaha korriinka ee ilmo-korsashada iyo caafimaadka carruurta.

www.adoptmed.org/home

Adeegyada Caafimaadka Maskaxda

Health Care Authority (Maamulka Daryeelka Caafimaadka, HCA) wuxuu bixiyaa maalgelin iyo kormeer adeegyada caafimaadka maskaxda ee dadka ka diiwaangashan Apple Health (Medicaid).

www.hca.wa.gov/health-care-services-supports/behavioral-health-recovery/mental-health-services

Golaha Waqooyiga Maraykanka ee Carruurta la Korsan karo

Waxay siisaa macluumaadka ilmo-korsashada iyo adeegyada carruurta ee nidaamka daryeelka korinta ee Maraykanka.

www.nacac.org

Ururka Qaranka ee Caruurta Ay Saamaystay Isticmaalka Daroogadu - Gobolka Washington

NOFAS Gobolka Washington waa isha taageerada iyo agabka loogu talagalay shakhsiyaadka qaba xanuunka ka dhasha marka waalidku isticmaalo daroogo, daryeelayaashooda iyo bixiyayaasha bulshada.

www.nofaswa.org

Helitaanka Daryeelka Cunuga

Khayraadka dhammaan dhinacyada ilmo-korsashada gudaha iyo dalka, oo ay ku jirto ilmo-korsashada daryeelka korinta. Waxaa ku jira macluumaadka loogu talagalay waalidiinta mustaqbalka iyo kuwa ilmaha-korsanaya, macluumaadka ku saabsan raadinta qaraabada dhalashada iyo agabka xirfadlayaasha qorista qoysaska korsada, u diyaarinta carruurta iyo dhalinyarada, taageeridda waalidiinta dhalay, bixinta adeegyada korsashada ka dib.

www.childwelfare.gov/adoption/index.cfm

Gobolka Washington Medicaid:

Khayraadka laga helo bixiyayaasha koowaad ee Medicaid ee Gobolka Washington.

<https://fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider/>

Waalidka Ilmo-korsashada & Daryeelka Qaraabada

Waxay bixisaa macluumaadka khayraadka adeegga bulshada.

www.dcyf.wa.gov/services/foster-parenting



www.dcyf.wa.gov

Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan la xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qaybaha) (1-800-723-4831 | 360-902-8060, ConstRelations@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION CWP_0063 | DSHS 22-1211 SM (06-2021) Somali